



Cusbooneysiinta xiritaank cimilada: Hawlaha Jimcaha waa inay soo dhamaadan 7 p.m., Hawlaha dhamaadka fasaxa waa la joojiyay

Cimilada khatarta ah ee lasaadaaliyay, Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waxay ugu baaqeen dhamaan hawlaha ka jira kambaasyada degmada iyo dhismayaasha inay dhammeeyaan 7 p.m. Jimcaha oo joojisay dhamaan hawlaha dhamaadka isbuuca.

Hawlaha dhamaadka isbuuca ee la joojiyay ayaa waxaa ka mid ah safarada dibadda iyo dhacdooyinka kale ee ku lug lahaan lahaa gaadiidka gaarka ah.

PPS waxay dib u qiimeyneysaa xaaladaha cimilada iyo waddooyinka axadda oo waxay u sheegi doonaan qoysaska sida ugu dhaqsaha badan ee ku saabsan xiritaan kasta, dib u dhac ama isku hagaajinta waddada baska ee Isniinta.

Waxaa jira saddex siyaabood aan u farriimaha ugu dirno qoysaska oo ku saabsan dib u dhacyada, xiritaanada iyo go'aanada kala ee la xiriira dhanka cimilada:

- **Wicitaanka telefoonada:** Wicitaanada telefoonka oo toos ah, oo ah dhammaan luqaddaha la taageero (Isbaanish Vietnamese, Chinese, Russian iyo Soomaali), ayaa la sameyn doonaa iyada oo loo diri doono lambarka muhiimka ee ku qoran diiwaanka ardayda kasta. Haddii aad dhawaan bedeshay lambarkaaga, fadlan ka cusbooneysii dugsigaaga.
- **Email-ka:** Fariin toos ah ayaa loo diri doonaa cinwaanka email-ka ee ku jiran diiwaanka ilmahaaga. Farriintan waxaa loo turjumi doonaa shan luqaddood oo la taageero.
- **Farriinta dhanka telefoonka:** Wuxaad farriin ku heli doontaa telefoonkaaga gacanta, balse waa in aad marka hore doorataa nidaamka Fariin Qaadaha Dugsiga ‘SchoolMessenger’ adiga oo farriin ku diraya “Yes” ama kaliya “Y” unu diraya 68453. Ogow: Haddii aad doorato, wuxaad heli doontaa wicitaan toos ah ‘auto-dialer’.

Waxaan sidoo kale macluumaadka cusub soo gelinaa internet-ka:

- **Twitter:** La soco koontadeena, [@PPSConnect](#).
- **Facebook:** Aan isku xirnaano www.facebook.com/pps.homepage.
- **Website-kayaga:** Booqo pps.net oo raadi meesha wax laga sii gelayo ee jaalaha ah ee ku taala dhinaca sare ee bogga hore ee internet-ka. Halkaasi waa meesha aad ka heli dooni macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah, sida waddooyinka barafka ee loogu talagalay basaska. Farriimaha waa la turjumi doonaa.

